

Shaandheynta Internetka ee Securly

Securly ayaa marka hore lagu tijaabinayaa Harrison Park K8 iyo Marysville K8.

- **Goorta Bilowga Tijaabada: 1/21/21**
- **Degmo-Waaweyn: Imaatinka ugu dhakhsaha badan, iyadoo la sugayo ogeysiinta ardayda**

Degmadeenu waxay adeegsataa Securly si looga caawiyo qoysaska dejinta xeerarka shaandheynta internetka ee carruurtooda inta ay isticmaalayaan aaladaha iyo koontooyinka dugsiga.

Waalid ahaan, waxaad u adeegsan kartaa Securly si aad meel waliba ugala socotid waxqabadka internetka ee ilmahaaga waqti kasta, adigoo adeegsanaya barnaamijka SecurlyHome. Waxaad ku isticmaali kartaa warbixintan onlaynka si aad ula bilowdo ilmahaaga wada hadal ku saabsan noloshooda dhijitaalka ah. Securly ayaa sidoo kale kuu soo diri doonta warbixino iimeyl oo toddobaadle ah kuwaas oo ay qoran yihiin macluumaad kooban oo ku saabsan waxqabadka internetka ilmahaaga.

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo

Sideen ku heli karaa barnaamijka Securly Home?

- Ka soo dejsa barnaamijka keydka barnaamijyada (app store). Taabo batoonka gelidda oo dooro ikhtiyaarka "Get instant access" kadib markaad gelisid iimeylka kaaga diiwaangashan dugsigaaga.
- Ka eeg iimeylkaaga iimayl cinwaankiisu yahay "Your Securly login link". Guji si aad u furto barnaamijka.
- Hadda waad soo gashay oo waa diyaar!

Waa maxay farqiga u dhaxeeya barnaamijka moobilka, warbixinta iimeylka ee toddobaadlaha ah, iyo bogga internetka?

- Barnaamijka moobilka ee SecurlyHome wuxuu waalidiinta siiyaa adeegyada ugu dhameyskatiran.
- Si toos ah u eeg warbixinta waxqabadka onlaynka ee ilmahaaga.
- Taabo batoonka Hakinta (Pause) si aad u daarto/u damiso khadka internetka ee aaladda dugsiga ee ilmahaaga.
- Warbixinta iimeylka ee toddobaadlaha ahi waxay bixisaa macluumaad kooban oo ku saabsan waxqabadka ilmahaaga ee toddobaadkii hore.

- Bogga internetku wuxuu kuu saamaxayaa inaad eegto Warbixinnada Waxqabadka iyo inaad ku dartid/ka saartid bogga xeerarka khaaska ah.

Maxaan iimeyl uga helayaa Securly?

Markaad isdiwaangaliso, waxaad marin u heli doontaa barnaamijka SecurlyHome waxaanad bilaabi doontaa inaad hesho warbixino iimeyl oo toddobaadle ah kuwaas oo ay ku qoran yihiin macluumaad kooban oo ku saabsan waxqabadka internetka ee ilmahaaga.

Dugsigu wuxuu diiwaangeliyay cinwaankayga iimeylka, laakiin weli kamaan helin iimeyl Securly. Maxaa dhacay?

Waxay qaadan kartaa 24-48 saacadood in wax walba laga soo raro dugsiga degmada.

Hubso inaad iimeyl ka yimid Securly ka eegto galkaaga Spam/Junk.

Miyaan ku dari karaa cinwaanka iimeylka koontada ilmahaaga?

Sababo amni awgood, diiwaangelintaada Securly waxay ku xiran tahay cinwaanka iimeylka aad siisay dugsigaaga. Fadlan la xiriir dugsigaaga si aad uga codsato wixii isbeddel ah ee lagu sameynayo cinwaanka iimeylkaaga.

Waxaan haystaa carruur badan. Sideen ku oggaan karaa sheyga ku jira Warbixinta Waxqabadka ama "Tab-ka" iyo ilmaha iska leh?

Cinwaanka iimeylka ilmahaagu wuxuu ku ag qoran yahay shay kasta oo ka mid ah Warbixinta Waxqabadka waana sida ay u kala horreeyaan.

Si aad u eegto waxqabadka ilmo walba, guji meenyuuga hoos-u-furma (drop-down menu) ee leh "All Activities", oo xulo ilmaha aad rabto inaad eegto. Ama, ku qor cinwaanka iimeylkooda meesha raadinta ee ku taala dusha sare kadibna guji "enter".

Yaa kale oo arki kara waxqabadka onlaynka ee ilmahaaga?

Maamulayaasha shabakadaha degmada waxay arki karaan dhammaan diiwaanada. Shaqaalaha dugsiga waa loo wakiishan karaa gelitaanka koontada si ay u helaan diiwaanada, haddii loo baahdo. Dugsigaagu wuxuu ku siin karaa liistada waalidiinta/mas'uuliyiintu gali kara iyadoo lagu saleynayo diiwaanada ardayga.

Macluumaad nooc ee ah ayay Securlly ururisaa?

Securlly waxay kormeertaa waxqabadka ilmahaaga ee onlaynka ah inta uu dugsiga joogo, iyo inta uu dugsiga ka maqan yahay haddii uu isticmaalayo aalad dugsigu siiyay oo ay shaandheyso Securlly.

Securlly waxay ururisaa cinwaanada iimeylka ee dugsigu bixiyay, cinwaanada IP-ga ee dadweynaha (oo uu heli karo qof kasta oo onlayn ah), boggaga internetka ee la booqday, ereyada la baaray, muuqaalada YouTube, iyo waxyaabaha lasoo dhigay baraha bulshada (haddii in la isticmaalo baraha bulshada uu oggol yahay dugsigu).

Ka waran haddii aan qabo su'aalo aan lagaga jawaabin Su'aalahan Inta Badan La Isweydiyo?

Wixii su'aalo dheeraad ah, fadlan iimeyl u soo dir support@pps.net